## KU SOO NOQOSHADA IYO DIB ISU DHEXGALKA DALAKAAGA OO LA AGA CAWINAAYO ADIGO RAAL KA AH EE WADANKA ICELAND

Hay’ada Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) waxa ay fulinaysaa barnaamijka dib u noqoshada iyo dib-u-dhexgalka iskaa wax u qabso ah (AVRR) ee ay weheliso Agaasinka Socdaalka Iceland taas o ka cawiso qofki raba in u dalkiisa dib ugu noqdo isaga o raali ka ah.

Qabanqaabada safarka ka sokow, ka-faa'iideystayaasha waxay heli karaan taageerada dib u-dhexgalka ee imaatinka ka dib oo u dhexeysa EUR 1,200 oo lacag caddaan ah ilaa EUR 4,200 oo ah shaqo abuur loogu talagalay qof weyn. Qadarka taageeradu waxay ku xidhan tahay dalka aad dib ugu soo laabanayso iyo shaqo abuurka aad dooraatay.

Taageerada lagu siinayo qayb yar oo ka mid ah deeqda waxa lagu bixiyaa lacag caddaan ah iyo qayb weyn oo ah adeegyada ama badeecadaha waxana ka cawinayo xafiiska IOM ee deegaankaga. Tusalooyinka ku habboon isticmaalka taageerada nooca-ah waxay noqon karaan. Bixinta kirada guryaha, kharashka waxbarashada, adeegyada daryeelka caafimaadka ama bilaabida ganacsi.

Ka faa'iidaystayaasha Mashruuca IOM AVRR ee gargaarka waxa ka mid ah soogalootiga go'doonsan, soogalootiga aan joogtada ahayn, magangalyo doonka ee go'aansada in aanay sii wadin sheegashooyinkooda ama kuwa la ogaado in aanay u baahnayn ilaalin caalami ah. Caawimada waxa kale oo la siin karaa soogalootiga xaaladaha nugul, sida dhibanayaasha tahriibinta, carruurta aan lala socon iyo kuwa kala maqan, ama soogalootiga leh baahiyaha caafimaadka la xiriira.

## FAAHFAAHINTA XIRIIRKA

**Iceland**

**The Icelandic Directorate of Immigration (UTL)**

Bæjarhraun 18, 220 Hafnarfjörður, Iceland

+354 444 0900

return@utl.is

www.utl.is

**Finland**

**Hay’ada Caalamiga u qaabilsan Socdaalka ee ( IOM)**

Ciwaanka Boostada:
P.O. Box 851, 00101 Helsinki, Finland

+358 40 642 7673 / +354 40 628 2124

isavr@iom.int

www.iom.fi
www.iom.int

Warqadan waxa so saaray xafiiska Hay’ada Caalamiga u qaabilsan Socdaalka ee ( IOM) ee wadanka Finland- waxa taaba galiyay mashrucan ‘’ Caawinta Dib ugu noqoshada iyo shaqa abuurka dadka muhajirinta ku ah wadanka Iceland ( AVRR-ICE).

# Ma ku fikiraysaa inaad ku noqoto wadankaagi?

*Mashruuca dib unoqoshada xorta ah –(AVRR) waa badbaado, karaamo iyo hab bini'aadantinimo oo lagu noqdo*

UTL
ÚTLENDINGASTOFNUN
ICELANDIC DIRECTORATE OF IMMIGRATION

IOM
UN MIGRATION



© IOM 2016/Amanda Nero



# NIDAAMKA SOO LAABASHADA DADKA USO LAABTA SI ISKOOD AH

IOM
UN MIGRATION

**1**

La-talinta ka- hor inta adan dib ulaaban wadankaaga mashruuca AVRR- iyo macluumaadka ku saabsan xaaladda waddanka aad ka timid ayaa lagu siin doonaa si aad u gaarto go'aan xog ogaal ah oo ku saabsan dib noqoshada.

**2**

Buuxi oo saxeex codsiga ku noqoshada ikhtiyaarka ah iyo foomka ku dhawaaqida ikhtiyaarka ah ee Iceland.

**3**

UTL waxay u soo dirtaa foomamka IOM ee Finland halkaas oo laga so shaqeeyo codsigaaga

**4**

IOM way kula soo xidhiidhi doontaa oo waxay ku siin doontaa macluumaadka ku saabsan qabanqaabada safarka iyo taageerada dib u noqoshada. IOM waxay kaloo xaqiijin doontaa dib unoqoshada ad codsatay in usan ahayn mid lagugu qasbay.

**5**

Haddii aadan haysan dukumeenti socdaal oo sax ah, IOM ayaa kaa caawin karta sidii ay safaarad kaaga soo heli lahayd.

**6**

Marka dukumeentiga socdaalku diyaar yahay, IOM waxay samayn doontaa qabanqaabada safarka oo ay kugu wargelin doonta.

**7**

Xaalad kasta oo caafimaad oo aad leedahay waxaa lagu tix galin doonaa sida dawada lagu siin lahaa iyo hirgelinteda markad dib ugu noqotid dalkaga.

**8**

Shandadaha lagu ogolyahay inad la safarto way ku kala duwan tahay shirkadaha diyaaradaha, laakiin badanaa waa 1 x boorso weyn + 1 x boors qadasho ah cala qof.

**9**

UTL waxay kugu kulmi doontaa oo ku caawin doontaa Gegida Diyaaradaha ee Keflavik waxayna ku siin doontaa deeq lacageed o cadaan ah.

**10**

Shaqaalaha IOM ayaa kula kulmi doona oo kaa caawin doona garoommada eraporka markad dib ulaabatid.

**11**

IOM ayaa kuu diyaarin doonta gaadiid ku geeya hadi ad ubahato gurigaaga.

**12**

IOM waxa ay ku siin doontaa taageerada dib u labashada ee shaqo abuurka ah ee xaqa u leh iyo haddii loo baahdo shaqaaluhu waxa ay ka caawin karaan qorsho lagu isticmaalayo shaqo aburka ad rabtid marka ad dib unoqotid.